

Saadaasha Roob di'idda Soomaaliya ee Deyrta 2017

La soo bandhigay: 29 Agost 2017



Food and Agriculture Organization
of the United Nations




Roobabka la filayo waa caadi ama caadi waa ka hooseyaan inta badan qaybaha Soomaaliya inta lagu guda jiro xilliga Deyrta 2017

Roobabka deyrta inta badan waa ka gaaban yihii kana tiro yar yihii kuwa Guga. Hase ahaatee, waxay waxtar u yihii taageeridda hawla waxsoosarka beeraha, daaqa iyo sare kaca biyo u helidda isticmaallada kala duwan. Guud ahaan xilligu wuxuu bilowdaa daba yaaqada Sabteembar wuxuuna dhammaadaa Nofeembar. Si kasta oo ay ahaataba, waa iska bedbedelaa meel ka meel dhammaan dalka iyadoo ay qaybaha Waqooyi roobabka helaan waqtii aad uga horreeya qaybaha koofureed.

Shirka wacaalka Saadaasha Cimilada Geeska Afrikada Weyn wuxuu xaqijihey inuu hoos u dhac ku yimid fursadda lagula kulmayo dacdo El Nino ah inta lagu jiro bilaha Sebteembar ilaa Diseembar. Saadaasha roob di'iddu waxay muujineysa in xilliga Deyrta ee Soomaaliya laga filanayo uu noqonayo mid caadi ah (40% qiyaastii roobabku waa caadi) iyadoo loo badinyo inay suurtogal tahay in 35% ay roobabku caadiga ka hooseyaan badi qaybaha dalka. Tan waxaa sidoo kale ka mid ah qaybo ka tirsan buuraleyda sare ee Itoobiya oo biyo ku biiriya webiyada Juba iyo Shabeelle ee gudaha Soomaaliya. Waxaa intaa dheer, Gobollo xeebeedka Jubada Hoose iyo Shabeellaha Hoose ayaa waxaa la filaya in ay la kulmaan roobab caadi ah (40% qiyaastii roobab caadi ah) oo laga yaabo in 35% ay noqdaan wax korreeya roobabka caadiga ah sida lagu arkayo Jaantuska 1.

Saadaashani waa saadal la isku afgartay oo loogu talagalay dhageysteyaasha gobolka oo wax ka qabta roobabka wadar ahaan marka isugeeyo muddada saddexda bilood oo ka bilaabmaya Oktoobar ilaa Diseembar 2017. Hase yeeshi, SWALIM iyo la-hawlgaalyaasha kale ee farsameed waxay sii wadi doonaa waafajinta saadaashaan muddooyinka gaagaaban ee soo socda oo waa ay idin lawadaagi doona iyagoo ku soo gudbin doona jariidadaha joogtada ah inta xilli roobaadku uu socdo.

Jaantuka 1: Saadaasha Roob di'idda ee Oktoobar ilaa Diseembar 2017



Marka la eego xaaladaha jira iyo saadaasha roob di'idda, waxaa la yaabaa in dhibaatooin la xiriira biyo yaraan ay ka sii socdaan gaar ahaan qaybaha Waqooyi ee dalka halkaasoo saddexdii xilli roobaad ee hore ay ahaayeen kuwo ka hooseya heerka caadiga ah. Waxaa sidoo kale jira suurtogal ahaansha qulqulatooyin u dhixeyya bani'aadan-xoolo oo isaga hor imaanaya ilaha biyaha xaddidan oo meelahaas ka jira. Kormeer si dhow loogula socdo xaaladda iyo tallaaboojin wax lagu bedelayo ayaa lagama maarmaan u ah sidii si waxkuool ah wax looga qabto xaaladda. Si kastaba ha ahaatee, meesha lagama saari daadadka butaaca oo ka dhaca iyo sidoo kale khadka webiga fataahaya oo sababtu tahay gebiyada webiga oo dacif iyo daamanka webiga oo loo jebiyo iyadoo looga dan leeyahay in waraab loo adeegsado.

Waxaa laga filaya in biyo ka helitaanku ka kordho meelaha roobabku ay caadi ka yihii. Xaaladaha noocaas ah, waa in bulshooyinku ay ka faa'ideystaan roobabka oo hoor-qabsadaan marka ay da'ayaan si ay mustaqbalka u isticmaalaan, iyagoo adeegsanaya farsamooyin fudud. Dhanka kale, hadii ay jiraan roobab hoos u dhacsan waxaa laga yaabaa in dib-u-buuxsamidda meelaha ilaha biyaha dhusha sare ah ay yaraato sidaas awgeed bulshooyinku waa inay khayraadyada biyaha la haysto u isticmaalaan si beekhamin/tashiil leh.

SWALIM Technical Partners



SWALIM Funding Agencies

